

KHARASHKA CODSIGA DHALASHADA

BARNAAMIJKA DEYNTA DHALASHADA MUWAADDINKA CUSUB

HADDII AAD MAREYKANKA KU HAYSATO DEGGENAANSHO SHARCI AH OO AAD KU NOOSHAHAY SAINT PAUL, AFFINITY PLUS AYAA KU SIINEYSA MAALGELIN AAN DULSAAR LAHAYN OO AH ILAA IYO \$2,000, SI AAD ISAGA BIXISO LACAGTA WARAAQAHA CODSIGA DHALASHADA

Waxaan ognahay in ay lacagta codsiga dhalashada qaali tahay. Haddii aad dalka Mareykanka ku haysato Deggenaansho Joogto ah oo aad ku nooshahay magaalada Saint Paul, MN, oo aad buuxiso shuruudaha xaqa loogu yeesho qaadashada dhalashada ama jisiyadda, kharashka codsiga waa in uusan wax caqabad ah idinku noqon adiga iyo qoyskaaga. Barnaamijka waa hawl aan la kaashaneyno magaalada St. Paul si aan dadka ugu taageerno adeeg ah maalgelin, tasiilaad iyo macluumaadka habraaca codsiga.

Affinity Plus Federal Credit Union waxay bixisaa deyn aan wax dulsaar ah lahayn oo ah ilaa iyo \$2,000 oo lagu soo bixin karo 1 sano gudahiis si la isaga bixiyo kharashka codsiga dhalashada ee Laanta Socdaalka iyo Adeegyada Jinsiyadaha Dalka Mareykanka (USCIS).

Lacagta codsiga deynta waa \$75, oo \$50 ayaa la soo celin doonaa ka dib marka deynta oo dhan la soo wada bixiyo. Ma jiraan lacag kale oo la iska qaadayo oo ah lacag-sannadeed iyo ganaax marka degdeg loo soo bixiyo lacagta qaarkeed ama gebi ahaan. Waxa kale oo la sameyn karaa lacagbixin Bil-ka-Boodid. Lacagbixinta ugu horreysa waxaa la bilaabi karaa 45 maalmood ka dib marka deynta la qaato.* Adiga ayaa kala dooran kara taariikhda bixinta lacagta oo waxaad sameysan kartaa in lacagbixin si toos ah lagaaga soo goosto. Lacagaha waxaa si toos ah loogu shubayaa USCIS.

Kalsooni ayaad ku qabi kartaa Affinity Plus in ay kuugu caawiso deyntaas ah lacagta laga iska rabo codsigaaga dhalashada. Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah soo garaac (651) 312-9747.

**Amaah ah 12 bilood ah oo aan dulsaar lahayn (0% APR) oo bil kasta la soo celin doono \$83.33 marka la amaahdo \$1,000.*



AFFINITY PLUS
FEDERAL CREDIT UNION



BARNAAMIJKA DEYNTA DHALASHADA MUWAADDINKA CUSUB

Soogalooti ahaan, waxaa laga yaabaa in aad ka welwesho kharashka codsiga dhalashada, gaar ahaan haddii ay dhalashada wada codsanayaan xubno badan oo qoyskaaga ka tirsan. Barnaamijka Deynta Muwaaddinka Cusub ee Affinity Plus wuxuu ku siinayaa maalgelin muhiim kuu ah oo aad isaga bixineyso kharashka codsiga.

KHARASHKA CODSIGA DHALASHADA WAA IN UUSAN IDINKU NOQON CULEYS ADIGA IYO QOYSKAAGA MARKA AAD RABTAAN IN AAD QAADATAAN DHALASHADA.

Adiga iyo qoyskaaga ayaan idinku caawineynaa arrintan muhiimka idiinku ah markaad ku sii nolaaneysaan dalka Mareykanka.

FAA'IIDOOYINKA MUWAADINIMADA MAREYKANKA

➤	Waxaad codsan kartaa in lagu keeno xubno ka mid ah qoyskaaga, sida carruur, waalid, iyo walaalo si ay ugu soo guuraan dalka Mareykanka.
➤	Haddii aad haysato dhalashada Mareykanka badanaa waxa fudud oo si degdeg ah la isugu keeno waa nin iyo haweeney isudhaxay iyo carruurtooda.
➤	Qaadashada dhalashada Mareykanka waxay caawin kartaa carruurtaada. Marka ay jiraan carruur ay da'doodu ka yar tahay 18 sano oo haysata sharci ah deggenaansho joogto ah oo aan weli xaas ahayn, si toos ah ayey dhalashada u qaadanayaan marka ay waalidku qaataan dhalashada ka dib.
➤	Doorasho kasta ayaad codkaaga ka dhiiban kartaa.
➤	Waxaad u tartami kartaa xafiis dawladeed.
➤	Waxaad ku noolaan kartaa oo aad u safri kartaa meel ka baxsan Mareykanka adiga oo haysanaya dhalashadaada.
➤	Waxaad codsan kartaa shaqooyinka federaalka oo laga yaabo in ay kaaga baahan yihiin inaad haysato dhalashada Mareykanka.
➤	Inaad u safarto dalal shisheeye oo badan ayaa aad kuu fududaanaya markaad haysato dhalashada Mareykanka.

BARNAAMIJKA DEYNTA DHALASHADA MUWAADDINKA CUSUB FAA'IIDOOYINKA MUWAADINIMADA MAREYKANKA HABKA CODSIGA AYAA FUDUD.

Waa in aad xaq u yeelato in aad buuxsan karto dhalashada Mareykanka oo aad ku nooshahay Saint Paul, MN.

Waxyaabaha deynta ugu muhiimsan waa:

➤	\$75 khidmad (\$50 ayaa la soo celin doonaa ka dib marka deynta la bixiyo)
➤	0% heerka dulsaarka
➤	Shuruudaha bixinta oo dabacsan ilaa 12 bilood
➤	\$2,000 lacagta la deysan karo ee ugu badan
➤	Waxaa deynta heli kara dadka deggan Magaalada St. Paul ee dhalashada Mareykanka ka codsanaya Laanta Socdaalka iyo Adeegyada Jinsiyadaha Dalka Mareykanka (USCIS)
➤	Ma jiro ganaax noqon kara lacag-bixin horumaris ah
➤	Waxaa la sameyn karaa lacagbixin ah Bil-ka-Boodid
➤	Lacagta 1aad waa in lagu bixiyo 45 maalmood maalgelinta ka dib
➤	Waxaa lacagbixinta la sameyn karaa bil kasta oo si toos ah ayaa la isaga soo goosan karaa
➤	Lacagaha waxaa si toos ah loogu shubayaa USCIS

Waa barnaamij cusub oo gaar ku ah dadka idinla midka ah adiga iyo qoyskaaga, oo Affinity Plus ayaa hawshan sameyneysa iyada oo la kaashaneysa magaalada Saint Paul, MN.

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH AMA SI AAD U CODSATO, SOO GARAAC (651) 312-9747.